# Sida ilmahaaga looga ilaaliyo RSV

## Fayraska isku midka ah ee neefsashada (RSV)

RSV waa fayras caadi ah oo sababi kara caabuqyada neefmareenka (neefsashada) ee dhallaanka yaryar. Dhallaanka ka yar lix bilood ayaa RSV awgiis uga xanuun badan dhallaanka waaweyn.

Tallaalka RSV waa bilaash. Wuxuu ilmahaaga ka ilaaliyaa caabuqa daran ee RSV, isagoo in ka badan 80% yareeya halista ah in isbitaal la seexiyo.

## Intee ayuu RSV u badan yahay?

- **2dii ilmoodba 1 ayaa** qaada RSV jiilaal kasta. Qaar badan ayaa u baahan daryeel caafimaad oo ay ka helaan dhakhtar ama qaybta xaaladaha degdegga ah.
- **100kii ilmoodba 3** ayaa la geeyaa isbitaalka, qaarkoodna waxay u baahan yihiin daryeelka bukaanka xaaladdoodu culus tahay.

## Sideen ilmahayga uga tallaali karaa RSV?

- Dhallaanka dhasha **1 Sibteember 2026–28 Febraayo 2027:** Waxaan ilmahaaga siinaynaa tallaalka kahor inta aadan ka bixin isbitaalka hooyada iyo dhallaanka.
- Dhallaanka dhasha **1 Maarso 2026–31 Agoosto 2026:** Waxaad ka helaysaa dhakhtarka guud (GP) ee ilmahaaga.
- **Dhallaanka khatarta sare ku jira** ee ka yar 24 bilood: Weydii dhakhtarka carruurta ama dhakhtarka dhallaanka.



## Tallaalka nirsevimab

- Waxaan ku talinaynaa nirsevimab si ilmahaaga looga tallaalo caabuqa daran ee RSV.
- Wuxuu isla markiiba bilaabaa inuu ilmahaaga ilaaliyo qiyaastii 5 bilood inta lagu jiro dayrta iyo jiilaalka, marka RSV uu ugu badan yahay.
- Waxaa lala siin karaa tallaallada kale ee carruurnimada.
- Wuxuu ilmahaaga si toos ah u siiyaa unugyada difaaca jirka si ay ula dagaallamaan caabuqa.

## Badqabka iyo waxyeellooyinka soo raaca

- Daraasado ayaa muujiyay in nirsevimab uu yahay mid ammaan ah oo waxtar leh.
- Dhallaanka badankoodu ma yeeshaan waxyeellooyin soo raaca. In ka yar 100-kii ilmoodba 1 ayaa yeelan kara finan, guduudasho ama qandho.
- Falcelinta xasaasiyadda ama dareen-celinta xad-dhaafka ah waa dhif.
- Dhallaanka si dhow ayaa loola socdaa 15 daqiiqo kadib cirbadda.

## Wax badan ka ogow

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal umulisadaada, kalkaalisada rugta caafimaadka, kalkaalisada caafimaadka dadweynaha, dhakhtarka guud (GP) ama dhakhtarka carruurta.

- hse.ie/RSV
- Wakaalada Daawada ee Yurub (European Medicines Agency): ema.europa.eu

PROTECT PREVENT IMMUNISE